# Waqtiga schoolka lagu noqonaayo waaxa fiican in dhaamaan qoysku is xasuusiyaan ooy booqdaan dhakhtarka ilkaha!

## Carruurta ilko caafimaad qaba ayaa diyaar u bartaan!

<u>**Ilkaha caafimaad qabaa waxay tilmaamayaa waxbarsho cusub:**</u>

**Si joogto ahilmahaaga ugu caday oo ugu luqluq amaba dunta ilka dhexdooda ku nadiifi.**

Isticmaal caday yar oo jilicsan, adoo marinaya in yar oo dawada cadayga ah, u caday ih mahaaga markuu cuntada cuno ka dib waliba ka hor intaanu seexan. Haddii aanad caday heli karin, biyo ugu luqluq afka ilmahaaga.

**Ilaali cadayashada.**

U caday ilkaha ilmahaaga ilaa ay ka baranayaaninay kaligood cadaydaan. Dabadeed sii wadad oo si dhaw u tus hubina in ay caruurtu shaqadooda si fiican u qabanayaan iyagoo is ticmaalaya qadar aad u yar oo dawada cadayga ah.

**Dhiirigeli ilmahaaga inuu cuno cunto caafimaad leh iyo cunto fudud iyo si aad u hesho hurdo fiican.**

Afku waa furitaanka dhamaan jidhka iyo wax oogalaaban wuxuu saamayn ku yeelanayaa dhamaan qaybaha uu jidhku ka koobanyahay. Waxyaalaha sonkorta leh iyo dhegdheg, sida jalaatada iyo nacnaca ee qiimo u lahayn nafta waxay keeni karaan in ilkuhu jajabaan ama dalooshamaan. Cuntooyin nafaqo leh iyo hurdo fiican waxay caawimaad iyo koritaan fiican aa adagn u diyaariyaan in ilmuhu wax barto!

**La hadal dhakhtarka ilkaha, dhakhtarka kale ama hay'adaha ka shaqeeya daryeelka caafimaad una sharax arimaha ku saabsan caafimaadka afka ee ilmahaaga.**

Waa muhiim in ilmaha si joogto uu u oo arko dhakhtarka ilkaha intaanay muskiladi ku iman. Haddii dhakhtarka ilkaha aan la heli karin, ku dhiiri ilmahaaga in hayaaha bixiya daryeelka caafimaadku inay eegan si uu u eego inta aanay ku dhicindhibaato hor lihi. Dhakhtarka ilkaha ama bixiyaha daryeelka caafimaadka  ayaa sidoo kale kuu qori karaa isticmaalka dheeri ah sida fluoride .

Haddii dhaktarka ilkaha ay adag tahay in la helo, sababo la xiriira caymis ama culays dhaqaale, kaalmo waxaa laga heli karaa, ood la soo xidhiidhi kartaan Apple Tree Dental- Hawley, 888-683-1038 hadad u bahaan tahay taariikhda; Apple Tree Dental Fergus Falls , 877-998-2218 ama Caring Hands Dental Clinic, Alexandria, 320-815-5711.

Early Childhood Dental Network